Taariikhda
2020-11-04

Tilmaamaha dugsiga hoose dhexe ee ku saabsan Covid-19

Dugsiyada ku yaala kamuunka Hällefors ayaa markii hore masuuliyiinta/waalidka wargaliyey waxyaabaha khuseeya covid-19, iyadoo lagu saleynayo talooyinka ay Folkhälsomyndigheten bixinayso, xakameynta infegshanka ee gobolka iyo hay'ada waxbarashada (skolverket), ee laga bilaabo 2 Noofembar 2020. Macluumaadkani waa mid shaqeynaaya.

Si kastaba ha noqotee, waxa uu dugsigu doonayaa inuu kala caddeeyo waxa khuseeya ardayda dhigata dugsiga hoose dhexe. Dhammaan go'aanada habdhaqanka dugsiga khuseeya ee Covid-19 ayaa si wada jir ah loogu go'aamiyaa kooxda hogaanka Maamulaha dugsiga iyadoo lala tashanaayo Region Örebro län, dugsiyada kale ee gobolka ku yaala iyo sidoo kale talooyinka Folkhälsomyndigheten iyo Hay'adda Waxbarashada (Skolverket).

Dugsiga hoose dhexe iyo noocyada kale ee dugsiyada qasabka ah ayaa muhiim u ah caafimaadka carruurta iyo da'yarta. Sidaas darteed waxa muhiim ah in la helo isku dheelitirnaan u dhaxeysa baahida carruurta iyo xaquuqda da'yartu ee waxbarashada iyo tallaabooyinka xakameynta infegshanka ee la qaadaayo. Aqoonta hadda jirta ayaa ah in carruurtu sida caadiga ah ay yeeshaan calaamadokhafiif ah oo covid-19 h iyo in waxqabashada dugsiga aanay u muuqan inay faafitaanka cudurka waddo/isagukeenaayo.

Shaqaalaha ka shaqeeya dugsiga ayaan sidoo kale covid-19 laga helin wax ka badan inta laga helay shaqaalaha xirfadaha kale leh.

Waxbarashada qasabka ahi waxay khuseeyaa dhammaan ardayda caafimaadka qabta, ee aan calaamado laheyn ay dugsiga joogaan.
Xitaa ardayda leh xubin qoyskooda ka tirsan oo laga helay covid-19 ayaa dugsiga imaan kara haddii aanu ardaygu isagu wax calaamado ah lahayn. Waxa uu dugsigu laakiin dooranayaa in taageero mas'uuliyiinta doorata inay ilmahooga guriga ku hayaan marka uu jiro infegshan la xaqiijiyay oo qoyska dhexdiisa ka jira. Waxaan laakiin la qoreynin wax maqnaansho sharci darro ah marka la xaadirinaayo ardeyda, laakiin waalidka ayaa mas'uul ka ah dib wax ugu dhigista iyo u soo qaadista casharada ardeyga.
Shaqaalaha (dadka waaweyn) ee leh xubin qoyskooda ka tirsan oo cudurka qaaday waa inay guriga joogaan oo ay shan maalmood ka dib tijaabo covid-19 ah iska qaadaan.

Wax waxbarsho guri ah lama siin doono walaac la qabo dartiis.Ardayda caafimaadka qabta ee aan waxbarashada dugsiga ka qeyb qaadan ayaa laga qori doonaa maqnaansho sharci daro ah iyadoo dugsigu uu raacaayo habdhaqanka maqnaanshaha ee shaqeynaaya halkaas oo maqnaanshaha sharci darada ah ay micnaheedu noqon doonto in dugsigu uu warbixin u gudbin doono adeega daryeelka bulshada sida ku xusan xeerka §14: 1 SoL.

HÄLLEFORS KOMMUN
E-mayl
kommun@hellefors.se
Lambarka ururka:
212000-1942

Cinwaanka boosta
712 83 Hällefors
Cinwaanka booqashada
Sikforsvägen 15
Telefoonka
0591-641 00 vx
Fax
0591-109 76
Bankgiro
193-8950
PlusGiro
11808-3

Ardayda ama waalidka/masuulka ee ka tirsan kooxda khatarta ugu jirta ayaa xalal gaar ah loo sameyn karaa iyadoo maamulaha lagala hadlaayo.

Waa inaan wax arday ah, waalid/masuul ama shaqaale leh calaamadaha ugu yaryar ee covid-19 aanu dugsiga dhex joogin.Ardayda muujisa calaamado xiliga lagu jiro dugsiga ayaa guriga loo diri doonaa.

Ardayda ama shaqaalaha muujiya calaamado ka badan hal maalin waa inuu tijaabo Covid-19 iska qaadaa. macluumaad ku saabsan tijaabo iska qaadista 1177.se. Tijaabo iska qaadistu waa bilaash.
Haddii aad iska qaadatay tijaabo muujinaysa inaad covid-19 qabtid, waa inaad ugu yaraan toddobo maalmood guriga joogtaa marka laga soo bilaabo maalintii aad calaamadaha isku aragtay. Waa inaad sidoo kale aheyd bilaa qandho/xumad oo aad ugu yaraan laba maalmood caafimaad qabtey.

Haddii tijabadaadu ay tahay mid aan waxba laga helin, ayaad ku soo laaban doontaa, shaqada, dugsiga ama waxqabadka kale sida ugu dhakhsaha badan ee aad caafimaad iyo firfircoonaan ugu dareento oo aad wax qandho ah laheyn.

Ardayda guriga xanuun u joota ayaa maqnaansho maalin kasta lagu qoayaa Infomentor, iyadoo waalidka/masuulka uu mas'uul ka yahay dib wax ugu dhigista, xiriirka dugsiga lala leeyahay iyo u soo qaadista casharada ardeyga.

Tallaabooyin ka hortag ah ayaa la sii balaariyey si loogu dhimo faafitaanka fayruska ee dugsiga dhexdiisa:

- Macluumaadka ku socda waalidka/masuulka, ardayda iyo shaqaalaha ee ku saabsan tilmaamaha iyo talaabooyinka ka hortaga Covid-19 ee shaqeynaaya
- Macluumaadka ku saabsan iyo sameynta gacmo dhaqista ka dib booqashooyinka musqusha, biririfta/nasashada iyo qadada ka hor.
- Marar ka badan oo la nadiifiyo miisaska, taytor-ka, qalabka/agabka waxbabarashda/fasalka.
- Isticmaalida masaafada iyo ka fogaanshaha marka safka lagu jiro, iska ilaali saf sameysanka. Calaamadeynta masaafada.
- Midba meel ku meeleynta fasalka dhexdiisa.
- Ugu badnaan 10 ka qeybqaate ee kulamada tooska ah/jir aheed, ayaa khuseysa shaqaalaha.
- Aanay jirin kooxo arday ah oo la isku dhafay, ama meel iskugu soo ururinta ardayda fasallo kala duduwan oo wax ka badan 10 ka qeybqaate joogaan iyo fursad ay ku jiri karto ilaalinta masaafad u jirsashadu.
- Kulamada dhijitaalka ah ilaa inta ay suurtogal tahay, tusaale ahaan APT, shirarka dibadda.
- Macallimiintu waxa ay leeyihiin fursad ay guriga kaga soo shaqeynayaan qeybta shaqada ee ah waxyaalaha ka baxsan maalinta dugsiga ee ardaydaga.
- Si ka sii kala baahsan loogu kala fogeeyo qolalka cuntada ilaa intay suurtogalka tahay.
- Ardayda dugsiga sare ayaa cunno soo qaadanaaya oo ku cunaaya Pihlskolan si boos loogu banneeyo dugsiga hoose dhexe.
- Koob/galaas cusub ayaa la soo qaadaa marka cabitaan lagu soo ceshanaayo.

- Xiisadaha isboortiga ayaa ilaa intay cimiladu ka saamaxayso lagu qabanayaa dibedda, isbooriga la is taabanayona waa laga fogaanayaa.
- Ma jiraan booqashooyin la iska imaanaayo oo waalidka/masuulka ama cid kale oo dibada ka imaaneysa, kaliya kulamada ballamo la qabsadey ayaa la oggol yahay.
- Keenitaanka iyo soo-qaadida carruurtu waxay ka dhacaysaa dibedda ama albaabkayaga weyn/meesh dharka la sudho.
- Wax safar ah looma ogola shaqaalaha ama ardayda toona.
- Qofka muujiya calaamado covid-19 ah ayaa guriga loo dirayaa.
- Dugsigu waxa uu taageerayaa waalidka/masuulka ilmahiisa guriga ku haysa sababtoo ah in xubin qoyska ka mid ah laga helay covid-19, xaaladahaasna lama qoraayo maqnaansho sharci darro ah.

Dugsigu waxa uu si isdaba joog ah ugu raacayaa awaamiirta iyo tilmaamaha iyo cusbooneysiinta talaabooyinka iyo macluumaadka si joogto ah uga soo baxaaya dowlada. Waxyaabaha kor ku xusan ayaa shaqeyn doona illaa ogeysiis dambe.

Maamulka dugsiga
Dugsiyada hoose dhexe ee kamuunka Hällefors